



## Sida loola xiriiro Saraakiisha La Doortay Xusuusnow: Kumaa, Halkee, Maxaa & Sababta

Ma jiro qof khabiir ku ah wax walba, oo ay ku jiraan saraakiishayada la doortay. Hase yeeshe saraakiisha la doortay waxay dejiyaan sharciyo iyo siyaasado guud oo saameyn ku leh qayb kasta oo nooloshena ka mid ah. Tani waa sababta ay muhiim u tahay in si hufan loola xiriiro saraakiisha aan dooranay.

### Ka Dhig Mid Gaaban

Saraakiisha la soo doortay waxay u muuqdaan kuwo aad mashquul u ah, sidaas darteed xaqiiji inaad fariintaada gaabiso oo aad u qodobada beegsato. Tani waxay fariintaada ka dhigeysaa mid xoogan isla markaana waxay yarayn doonta fursada ah in fariintaada la iska indhatiro.

Markaad la xiriireyso saraakiisha la doortay, ha noqoto haddii aad u direysid farriin ama aad wadahalad la yeelanaysid, xaqiiji inaad marka hore ka sii fikirto qodobbada muhiimka ah ee aad rabto inaad u jeediso. Markaad diyaarinaysid fariintaada, had iyo jeer xusuusnow su'aalaha muhiimka ah ee ay tahay inaad ka jawaabto mar kasta: **Kumaa, Halkee, Maxaa & Sababta!**

#### Kuma: Kumaad tahay?

Xaqiiji inaad u sheegto saraakiisha la doortay qofka aad tahay iyo aragtida aad ka dhiibanayso wadahaladka.

*"Magacaygu waa Jane Doe waxaan maanta warqad kuu soo qorayaa anigoo ah bixiyaha daryeelka carruurta."*

#### Halkee: Halkeed ka socotaa?

Tani waa muhiim maxaa yeelay saraakiisha la soo doortay waxay rabaan inay ogaadaan inaad cod ku leedahay degmadooda.

*"Waxaan ku noolahay oo ganacsigeyga daryeelka carruurta ka hawlgalaa degmada lagaa soo doortay ee Tacoma, WA."*

#### Maxaa: Maxaad codsanaysaa?

Had iyo jeer xaqiiji inaad diyaarsato codsiga aad u direysid saraakiisha la doortay markii aad la hadlaysid, oo weydii haddii ay fiirin doonaan codsigaaga. Xusuusnow, ADIGA AYAY KUU SHAQEEYAAN.

*"Waxaan kuugu soo qorayaa inaan kaa codsado inaad lacag badan oo doollar ah gelisaan daryeelka carruurta. Miyaan kugu kalsoonaan karaa inaad taas samayso?"*

#### Sababtee: Muxuu codsigaagu muhiim u yahay?

La wadaag sababaha aad u codsaneyso arrintaas. Mid ka mid ah hababka ugu wax ku oolka badan ee arrintaan loo sameeyo waa in aad la wadaagto sheekadaada daryeelka carruurta ee kuu gaarka ah. Sheekooyinka shaqsiyadeed waxay ka caawiyaan saraakiisha inay si wanaagsan u fahmaan una xusuustaan arrimaha muhiimka ah.

Qaab kale ayaa ah inaad la wadaagto dhowr qodob oo xogo muhiim ah, sida in qiyaastii 60% ee carruurta da'doodu ka yar tahay lix sano ay ku nool yihiin guryo ay dhamaan dadka waaweyn ay shaqeeyaan, iyo in ku dhowaad 63% dadka reer Washington ah ay ku nool yihiin aaggag ay daryeelka carruurta aanu buuxin karin baahida jirta.

*"Xilligan, bixiyeyaasha daryeelka carruurta waxay kujiraan boqolkiiba 3 ee dhammaan mushaharaad shaqada Washington. Waan ogahay maadaama aan ka shaqeeyo ganacsiga daryeelka carruurta in mushaharka oo hooseeya darteed ay iigu adag tahay inaan shaqaaleysiyo oo aan sii haysto shaqaalaha isla markaana aan carruurta siiyo daryeel tayo."*

